



Gacaliye Waalidka/Wakiil:

Waxaanu ku faraxsannahay in adiga iyo qoyskaagu aad xubno ka tihiin beesheena kala duwan, halkaasi oo imika in kabadan 100 luuqaddood lagaga hadlo. Dusiyada Dadweynaha ee Degmada Prince William waxa ka go'an siinta arday kasta *Adduunka La-Jaanqaadaysa*. Maadaama gacanta qoysku ay aad ugu muhiim tahay shaqadaas, waxaanu ku faraxsannahay inaanu bixino woxogaa macluumaad aasaasi ah si aan uga caawino waalid iyo wakiil kasta inay fahmaan kuna lugyeeshaan waxbarada ilmahooga.

Agabka dugsiga oo dhan waxa lagu bixiyaa Ingiriisi; hase yeeshee, waxaanu si joogto ah ugu tarjumnaa dokumentiyada iyo macluumaadka muhiimka ah lixda luuqaddood ee inta badan laga codsado mandaqaddeena.

Ku hadlayaasha luuqadaha badankoodu waxay ka faa'idi karaan macluumaad muhiim ah oo si joogto ah loo cusboonaysiiyo oo kusaabsan Websaytka Dugsiyada dadweynaha ee Degmada Prince William — pwcs.edu— iyo baraha gaarka ah ee dugsiga. Dhammaan waxa kujira qalabka Tarjumaadda Google ee caanka ah, oo bixinaya tarjumaad xaddidan in kabadan 50 luuqaddood. Tarjumaadda kombiyuutaraysidhka ah inta badan sax ma aha, laakiin waxay waxa laga helaa xidhiidho qiime leh macluumaadka dugsiga. Haddaanad guriga ku haysan kombiyuutar, waxaad ka isticmaali karaa laybareeriyada dadwaynaha.

Waxa aad u muhiim ah, Qaybta Dugsiyada waxay galaangal u siisaa tarjumaanada xirfadlayaasha ah si ay uga caawiso ku hadlayaasha intooda badan luuqad kasta inay fahmaan dokumentiyada ay ku duugan yihiin macluumaad aasaasi ah oo kusaabsan xuquuqda, waajibaadka, filashooyinka ardayga iyo waalidka, iyo arrimaha kale ee la xidhiidha waxbarashada iyo dheefaha iyo adeegyada ardaydu ay heli karaan. Tarjumaanadu waxay ka caawin karaan shirarka waalidka arrimahan si ay u hubiyaan in ra'yiga qof kasta la sheego oo la fahmo. Adeegyadan waxa lagu siiyaa qoysaska bilaa lacag.

- **Isticmaal hababkan markaad u baahan tahay kaalmo gaar ah.** Onlayn—[booqo translations.pwcs.edu](http://booqo.translations.pwcs.edu)
- Isgee meesha—booqo dugsiga ilmahaaga. Waxa suurogal ah inaad waydo cid ku hadlaysa luuqaddaada. Hase yeeshee shaqaale ayaa isticmaali doona boostar si uu kuu kaalmeeyo.

DR. STEVEN L. WALTZ
Superintendent of Schools

Xaaladaha oo dhan, waxa lagu waydiisanayaa inaad dhiibto macluumaadka soo socda:

- Magacaaga iyo magaca ilmahaaga;
- Dugsiga ilmahaaga, heerka fasalka, iyo magaca macalinka;
- Qofka (magaciisa ama shaqadiisa) aad rabto inaad la hadasho, iyo waxa aad kala hadlayso; iyo
- Lambarka taleefanka iyo wakhtiga ugu fiican ee lagu heli karo.

Haddii ilmahaagu uu keeno guriga farriin dugsiga ka socota oo codsanaysa kulan; ama aad rabto inaad qorshayso wada xaajood aad la yeelato macalinka ama sarkaal kale oo dugsiga ka tirsan, isticmaal hababka sare si aad u codsato tarjumaan si uu kaaga caawiyo wada hadaladan muhiimka ah. Qof ayaa kugu soo celin sida ugu dhakhsaha badan.

Ku lugyeelashadaadu waxay keeni kartaa saamayn togan waxbarashada ilmahaaga, waxaananu ku hanwaynahay inaanu kaa kaalmayno anagoo kuu diyaarinayna adeegyadan. Waxaanu rajaynaynaa warqaddani inay si cad u gaadhsiinayso ka go'naanshiyaha Dugsiyada Dadweynaha ee Degmada Prince William ee ilmahaaga iyo adiga. Waxaan ku kalsoonahay inaad nala wadaagto doonistayada in arday kastaa helo Waxbarasho Heerka Adduunka ah.

Si Daacad ah,



Dr. Steven Walts
Kormeeraha Dugsiyada

*Markaad booqanayso pwcs.edu, ka raadi galoobka midabka badan si aad u ogaato meesha bogagga macluumaadka iyo xidhiidhada farriintan.

